# Barnaamijka Baaritaanka Ilmaha Hadda Dhashay Ee La Ballaariyay

**Barnaamijka Noowejiyanka ee baaritaanka ilmaha hadda dhashay ee jira, dhammaan waalidiinta waxaa la siiyay baaritaanka ilmaha hadda dhashay ee loogu tala galay ilmaha kudhashay dhego beelid (maqli waa), xanuun ilmaha ku dhasho ee ah in dheef-shiidkiisa uu shiidi waayo aashitada amayno (phenylketonuria (PKU)) iyo kuwa ku dhasha tayroodh maduun ah (hypothyroidism). Barnaamijka hadda waa la ballaariyay wax-aana lagu daray baaritaano loogu tala galay 21 xanuun oo dheeri ah oo xanuunada la xiriira hidda-wadayaasha oo dhif ah, lagu dhasho, kuwaas oo daawayntooda waqtiga hore ah ay tahay lagama-maarmaan**

Baaritaanka waxaa loo sameeyaa ayadoo laga qaadaya sanbal dhiig ah ciribka cunuga yar 48-72 saacadood kadib dhalashadiisa. Sanbalka dhiigga, oo la socda faah-faahinta magaca hooyada, lambarka aqoonsiga waddanka, cinwaanka iyo taleefoon lambarka, meesha uu ku dhashay (isbitaalka/bukaan socod eegtada), waqtiga uu dhashay, muddada caloosha lagu siday uur-kujirka, culeyska uu ku dhashay iyo jinsigiisa, waxaa baaritaan loogu dirayaa Nyfødtscreeningen (qaybta baaritaanka ee ilmaha hadda dhashay) oo ku taala Oslo universitetssykehus.

Hab-raaca wuxuu u baahan yahay in waalidiinta ay heleen xog ku saabsan baaritaanka iyo in ay bixiyeen oggolaanshahooda. Waalidiinta aan doonaynin in ilmahooda la baaro waa in ay ku war-geliyaan shaqaalaha qaybta isbitaalka ee hooyonimada. Waxaa lagama maar-maan ah in aad xooga saartid in ay sidoo kale jiraan xanuuno kale oo lagu dhasho kuwaas oo aan lagu oggaan karin baaritaanka dhiiggan.

### Waa maxay muhiimada uu baaritaanka u leeyahay ilmahayga?

Inkastoo ilmaha laga yaabo in si dhammaystiran ugu muuqdo caafimaad qab kadib isla marka uu dhasho, xaalado dhif ah waxaa laga yaabaa in uu qabo xaalad lagu dhasho sida xanuun dheef-shiidka la xiriira. Sida ugu dheer ee aan ilmaha loo daawaynin, waa sida heerka halista itaal-la'aan daa'im ah ama dhimasho ay u sarreyso. Sidaas awgeed waa muhiim in la oggaado xanuun kasta waqtiga ugu horreeya ee ugu macquul-san sidaas daraadeed ilmaha waxaa lagu bilaabi karaa daawaynta lagama maar-maanka ah.

Kaliya tiro yar oo ilmaha markaas dhashay ah (ku dhowaad 1000 kiiba 1) ayaa ku dhasha xanuunada laga baarayo, balse carruurtan oggaanshaha hore waa lagama maar-maan.

### Maxaa dhacaayo kadib marka baaritaanada la sameeyo

Natiijooyinka baaritaanka waxaa loo dirayaa isbitaalka/bukaan socod eegtada ee uu ilmaha ku dhashay. Haddii natiijada baaritaanka ay noqoto caadi, waalidiinta lalama soo xiriirayo. Haddii ilmaha looga shakiyo in uu qabo xanuun, waalidiinta waxaa si deg-deg ah ula soo xiriiraya takhtarka si loogu diyaariyo baaritaano kale. Haddii Nyfødtscreeningen ay hesho sanbal dhiig oo cillad-leh, waalidiinta waxaa la soo xiriiraya isbitaalka/bukaan socod eegtada ilmaha ee uu ku dhashay waxaana la waydiisanayaa in ay ku celiyaan baaritaan-ka. Waydiishada lagu waydiistay in aad ku celisid baaritaanka khasab ma ah in loola jeedo in ay jirto wax dhibaato ah oo laga shakiyay.

La socoshada qoysaska laga helo xanuun waxaa sida caadiga ah bixiya waaxda caafimaadka qaabilsan daawaynta carruurta ee deegaanka iyo/ama Oslo universitetssykehus. Haddii natiijo baaritaan ay muujiso xanuun, natiijooyinka baaritaanada kale waxaa sida caadiga ah loo heli karaa 1-2 toddobaad gudahooda.

### Sidee ayaa loogu kalsoonaan karaa baaritaanka?

Xaalado dhif ah, gaar ahaan ilmaha aan waqtigooda la gaarin dhasha, natiijooyinka baaritaanka waxaa laga yaabaa in ay muujiyaan xanuun inkastoo ilmaha uu run ahaantii ay yihiin kuwo caadi ah oo caafimaad qaba. Baaritaanada xiga ee la sameeyo waxay si dhakhso ah u soo saarayaan wixii shaki ku jiro.







## Kaydinta iyo isticmaalka sanbalada dhiigga

Kadib marka baaritaanka la sameeyo, inta ka harta sanbalka dhiigga waxaa loogu kaydinayaa qaab aan aqoonsi lahayn* bangigga oggaanshaha nooca cudurka naflayda ee Nyfødtscreeningen. Kaydinta sanbalka waxay oggolaanaysaa suurtogalnimada ah in lagu celiyo baaritaanka haddii uu jiro wax shaki ah oo ku saabsan oggaanshaha cudurka ama ku siyaadinta baaritaanada kale ee aanan jirin markii uu cunuga dhashay. Sanbalka waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa hubsashada tayada iyo horumarinta xeeladaha baaritaan ee cusub. Sanbalka dhiigga waxaa la baabi'inayaa 6 sannadood kadib.

## Kaydinta iyo isticmaalka macluumaadka shakhsi

TSi loo hubiyo xirfadaha ugu fiican ee shaqada bukaan socod eegtada ee baaritaanka ilmaha hadda dhashay, waxaa daruuri noqonaysa in la isticmaalo xogta barnaamijka baaritaanka, oo ay kamid yihiin natiijooyinka baaritaanka, faah-faahinta daawaynta la siiyay ilmaha ama cunsurooyinka kale ee laga yaabo in ay saamayso natiijooyinka baaritaanka, iyo sidoo kale wixii daawayn caafimaad ah ee hore loo siiyay. Ujeeddadu waa in la xaqiijiyo in baaritaanka loo sameeyay sida loogu kalsoonaan karo ee ugu suurtogalka badan iyo si loo ilaaliyo tayada daawayn ee loo siiyay xanuunka la baaray. Xogtan waxaa loo kaydiyay si aan xad lahayn.

Oslo universitetssykehus waxay sharci ahaan mas'uul ka tahay dhawritaanka xogta barnaamijka baaritaanka ilmaha hadda dhashay. Marka lagu diiwaan-geliyo barnaamijka baaritaanka, qofka qusaysa baaritaanka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogta iyo in xogtaasi la tirtiro (eeg *www.oslo-universitetssykehus.no/nyfodtscreeningen*). Haddii wax khaladaad diiwaangelinta ah la sameeyay, xuquuqda waxaa ka mid noqonaysa in la saxo xogta.

## Oggolaanshaha baaritaanka ilmaha hadda dhashay iyo kaydinta iyo isticmaalka xogta shakhsi

Hab-raaca wuxuu u baahan yahay in waalidiinta ay heleen xog ku saabsan baaritaanka iyo in ay bixiyeen oggolaanshahooda. Waalidiinta aan doonaynin in ilmahooda la baaro waa in ay ku war-geliyaan shaqaalaha qaybta isbitaalka ee hooyonimada.

Waalidiinta doonaya in ilmahooda la baaro, balse aanan doonaynin in sanbalka la kaydiyo waa in ay tani ku soo war-geliyaan Nyfødtscreeningen. Foomam gaar ah ee loogu tala galay war-gelinadan waxaa laga heli karaa qaybta hooyonimada/isbitaalka/bukaan socod eegtada ee uu ilmaha ku dhashay ama bogga internetka *www.oslo-universitetssykehus.no/nyfodtscreeningen*

Waxaan sidoo kale codsanaynaa oggolaashahaaga ah in aad oggolaatid in sanbalka dhiigga iyo xogta shakhsi loo isticmaalo hubsashada tayada iyo si loo horumariyo barnaamijka baaritaanka. Ka gaybgalka tani waa si iskaa-ah Waalidiinta aan doonaynin in ay bixiyaan oggolaanshahooda looma baahna in ay sheegaan sababaha go'aankooda, mana jiraan natiijooyin ka dhalanaya wixii daawayn ah ee uu qaato ilmaha.

## Cilmi-baaris

Sanbalada dhiigga iyo xogta shakhsi ee laga qaado Barnaamijka Baaritaanka Ilmaha hadda dhashay waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa cilmi-baarista. Tani waxay u baahan tahay oggolaansho gooni ah ayadoo la tixraacayo shuruucda caadiga ah ee cilmi-baarista daryeelka caafimaad ee la xiriirta bukaan socodka eegtada (eeg *www.oslo-universitetssykehus.no/personvern*).

## Xog badan

Nyfødtscreeningen waxay bixin kartaa talo iyo la talin ku saabsan xanuunada laga baaray. Bogga internetka ee Nyfødtscreeningen *www.oslo-universitetssykehus.no/nyfodtscreeningen* wuxuu bixinayaa sifooyinka xanuunadan iyo sida loo daaweeyo. Bogga internetka *www.helsenorge.no* wuxuu sidoo kale bixinayaa xog ku saabsan xanuunada dhifka ah iyo daawaynta loo heli karo.

Xunuunada qaarkood, adeegyada talo bixinta qaran waxaa loo aasaasay si ay u bixiyaan talo iyo la talin. Eeg *www.helsedirektoratet.no/funksjonshemninger* oo ku qoran liiska adeegyadan. Guddiga Agaasimeyaasha Caafimaadka – khadka taleefoonka caawimaada ee lacag la'aanta ee Waaxda baxnaanista iyo xanuunada dhifka ah waxay sidoo kale bixin karaan xog badan.

Khadka taleefoonka caawimaada lacag la'aanta ah: 800 41 710

Nyfødtscreeningen: Taleefoon. 02770, cinwaan e-mail nyfodtscreeningen@ous-hf.no

* La'aanta magaca ilmaha ama taariikhda uu dhashay, kaliya baaq sireedka sanbalka

Oslo universitetssykehus

Helsedirektoratet
Norwegian Directorate of Health

**Barnaamijka baaritaanka wuxuu baarayaa xaaladahan soo socda:** Phenylketonuria (PKU) (Xaalad xanuun ee uu ilmaha ku dhasho oo ah in dheef-shiidkiisa uu shiidi waayo aashitada amayno), Congenital hypothyroidism (CH) (Tayroodh macduun ah oo lagu dhasho), Propionic acidaemia (PA) (Xanuun dheef-shiid oo dhex-dhexaad ah), Methylmalonic acidaemia (MMA) (Xanuun dheef-shiididda aashitada orgaaniga ah oo la kala dhaxlo), Isovaleric acidaemia (IVA) (Xanuun dheef-shiididda ee aashitada amayno oo lagu dhasho), Holocarboxylase synthetase deficiency (HCS/MCD) (Xanuun dheef-shiid oo lagu dhasho kaas oo jirka aan awoodin in uu isticmaalo fitiimiinada), Biotinidase deficiency (BIOT) (Xanuun la kala dhaxlo oo an jirka isticmaali karin fitiiminka bayotin), Beta-ketothiolase deficiency (BKT) (Xanuun dheef-shiid oo aan jirka shiidi karin nooc ka mid ah aashitada amaayno), Glutaric aciduria type 1 (GA1) (Xaalad dheefshiid oo aan jirka gebi ahaan shiidi karin aashitada amayno), Medium-chain acyl-CoA dehydrogenase deficiency (MCADD) (Xaalad xanuun dheef-shiid oo la xirriirta shiididda aashitadaa fatty), Long-chain 3-hydroxyacyl-CoA dehydrogenase deficiency (LCHAD) (Xaalad xanuun dheef-shiid oo la xirriirta shiididda aashitadaa fatty), Trifunctional protein deficiency (TFP) (Xaalad ka hortagaysa in jirka uu tamar ahaan u qaato noocyo ka mid ah baruurta), Very long-chain acyl-CoA dehydrogenase deficiency (VLCAD) (Xaalad xanuun aan jirka qaadan karin baruurta), Carnitine transporter deficiency (CTD) (Xaalad xanuun aan jirka qaadan karin baruurta), Carnitine palmitoyltransferase I deficiency (CTP IA) (Xaalad dheef-shiid ee ka hortagaysa in jirka uu tamar ahaan u qaato aashitada fatty ), Carnitine palmitoyltransferase II deficiency (CTP II) (Xaalad ka hortagaysa in jirka uu tamar ahaan u qaato noocyo ka mid ah baruurta), Carnitine-acylcarnitine translocase deficiency (CACT) (Xaalad ka hortagaysa in jirka uu isticmaalo barruurta si uu tamar ugu helo), Glutaric aciduria type 2 (GA2) (Xanuunka aan jirka qofka isticmaali karin borotiinka iyo barruurta), Maple Syrup Urine Disease (MSUD) (Xanuun Dheef-shiidka aan shiidi karin noocyo ka mid ah aashitada Amayno), Homocystinuria/Hypermethioninaemia (HCU/MET) (Xaalad ay medonayn ay dhiigga xad-dhaaf ku tahay), Type I tyrosinaemia (TYR I) (Nooca I ee xanuunka aan dheef-shiidka shiidi karin aashitada tayrosiin), Congenital adrenal hyperplasia (CAH) (Qasan hoormoono iyo xubno), Cystic fibrosis (CF) (Sambab-galeenka la kala dhaxlo)